

UJEEEDO: Aaladda Horumarka Sanadaha Dhexe(Middle Years Development Instrument) (MDI)

Qoysaska Qaaliga ahow,

Hadaan nahay Hamilton-Wentworth District School Board (HWDSB), waxaa naga go'an ogaanshaha iyo meesha ka saaridda caqabadaha, si dhammaan ardaydu wax ugu bartaan deegaano taageero siinaya, loo dhan yahay ixtiraamna kajiro. Waxaanu sidoo kale badqabka ardayda ku taageernaa brnaamijyo, kaalmooyin iyo adeegyo sare u qaada korniinka caafimaadka leh iyo ka bogsashada cudurka safmarka ah ee COVID-19.

Noofambar, ardayda dhigata fasalada 4 ilaa 12 waxay dhammaystiri doonaan Aaladda Hormarka Sanadaha dhexe (MDI). Ardayda dhigata fasalada 4 ilaa 8 waxay xog aruurintaan dhammaystireen 2018 ardayda qarkoodna kuwaas oo dhigta labadaba dugsiga hoose iyo kan sare waxay dhammaystireen MDI ah qaab la soo gaabiyay gu'gaan hadda la soo dhaafay. Noofambar, ardaydu waxay samayn doonaan xog aruurintaan onleenka ah inta lagu jiro muddada dugsiga ayada oo uu qof shaqaalaha dugsiga ah korjoogtaynayo. Jawaabta canuggaagu waxay noqon doontaa mid gaar ah, qarsoon magac ahaana looma aqoonsan doono.

### **Waa maxay u jeddada daraasaddu?**

HWDSB waxay doonaysaa in ay si waaagsan u fahamto xaaladaha koritaanka canugga sanadaha dhexe kuwaas oo saamaynaya badqabka, caafimaadka iyo guulaha uu dugsiga ka gaarayo. Xog aruurintu waxay ardayda weydiin doontaa waxyaabo ku saabsan fakaradooda, dareenkooda iyo waxyaabaha ay kala kulmaan dugsiga iyo bulshada dhexdeeda. HWDSB waxay natiijada daraasadda u isticmaali doontaa in ay samayso go'aano muhiim ah oo ku saabsan barnaamijyada iyo adeegyada isbadalka ku sababaya canugga.

Xog aruurintu waxay ardayda su'aalo ka weydiinaysaa:

- 1) Korniiinka dhanka bulshada iyo dareenka ah, sida is qiimaynta, niyad wanaagga, farxadda iyo naxariista;
- 2) Dareemidda ku xirnaanshaha dugsiga, qoyska, saaxiibada, iyo bulshooyinka;
- 3) Waxyaabaha dugsiga uu kala kulmayo;
- 4) Caafimaadka jirka iyo badqabka; iyo
- 5) Isticmaalka wakhtiga ee xiliyada dugsiga laga soo baxo, iyo sida si lamid ah waxyaabaha caruurta ay jeceshahay kaddib marka ay dugsiga kasoo baxaan.

### **Sidee sirta canuggayga loo ilaalinayaa?**

Canuggaaga magac ahaan looma tilmaami doono inta lagu jiro daraasaddaan. Jawaabaha canuggaaga ma heli doonaan adiga ama dugsiga kale ama shaqaale katirsan guddiga dugsiga.

Aritaan waxaa loo samaynayaa in la xaqiijiyo in jawaabta canug kasta ay noqoto mid gaar ah oo qarsonn. Ma jiro macluumaad laga keenayo daraasaddaan oo la galinayo diiwaanka dugsiga ardaygaaga.

Haddii macluumaadka MDI loo isticmaalo daabacaadda cilmibaaris ama dukumiintiyoo dadweynaha loogu tala galay, canuggaaga iyo dugsiga canuggaaga sina looma tilmaami doono. Haddii wakhti uun canuggaagu uusan rabin in uu ka qaybqaato xog aruurinta, macalinkooda ayaa siin doona howl kale oo dugsiga oo badal ah.

Macluumaadka shakhsiga ah ee lagu aruurinayo MDI waxaa loo aruurinayaa si waafaqsan Farqada 28(2) ee Xeerka Xoriyadda Macluumaadka ee Magaalada iyo Ilaalinta Siraha (MFIPPA) kaasoo sheegaya in ururada sameeya howlo sharci ahaan la ogolyahay ay ka aruurin karaan macluumaad shakhsi ah shakhsiyaadka markay muhiim noqoto. MDI waxay gacan ka gaysanaysaa buuxinta shuruudaha Wasaaradda Waxbarashada ee guddiyada dugsiyada si ay xog uga aruuriyaan ardayda 2 dii sano ee kasta taasoo ku saabsan xaaladda dugsigooda.

### **Sidee ayay dugsiga iyo bulshadu uga faa'adaysan doonaan?**

Daraasadda MDI waxay ka caawinaysaa bareyaasha, qorsheeyayaasha barnaamijyada iyo xubnaha bulshada in ay wax ka ogaadaan nololsha caruurta ayaka oo ka ogaanaya isla codka caruurta. Dugsigaaga iyo bulshadaadu waxay u isticmaali karaan natiijooyinka sare u qaadidda nololsha caruurta. Waxaan rumaysannahay in daraasaddu ay siinayso faa'iidooyin fara badan oo wanaagsan caruurta iyo qoysaska deegaanka. HWDSB waxay la shaqayn doontaa saaxiibada ay kamidka yihiin City of Hamilton si loo xaqiijiyo in aan buuxino baahiyaha ardayda ee bulshadeena. Waxaan la wadaagi doonaa xog aan aqoonsiyo wadan oo laga keenayo xog aruurinta City of Hamilton si ay uga warqabto una hagaajiso barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda loogu tala galay caruurta iyo dhalinyarada.

### **Xagee ayaan macluumaad dheeraad ah ka heli karaa?**

Fadlan ogow waxyaabo badan oo ku saabsan MDI, kuwaas oo loo isticmaalo shuruucda kale ee Canada, si onleen ah [www.earlylearning.ubc.ca/mdi](http://www.earlylearning.ubc.ca/mdi).

Waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaad iyo ilo ku saabsan Horumarka Sanadaha Dhexe websaytka yaga <https://www.hwdsb.on.ca/elementary/supports/mental-health-and-well-being/mdi/> Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama tabashooyin ah oo ku saabsan ka qaybqaadashada canuggaaga, fadlan kala xariir Waaxda Cilmibaarista iyo Taxliilinta halkaan [research@hwdsb.on.ca](mailto:research@hwdsb.on.ca) 905-527-5092.

# HWDSB

**Research and Analytics Department**  
Hamilton-Wentworth District School Board  
20 Education Court, P.O. Box 2558  
Hamilton, ON L8N 3L1

Daacad kuu ah,

Guddiga Dugsiga Degmada Hamilton-Wentworth  
Waaxda Cilmibaarista iyo Taxlilinta

**curiosity • creativity • possibility**